# Xuquuqda iyo Waajibaadka ee Kaalmada Bulshada

## 1. Waa maxay xuquuqaha aan leeyahay?

Haddii aad gudbiso codsi saxeexan oo ku saabsan **Kaalmada Dhaqaale ee Bulshada**, waa in codsigaas ay ka jawaabto **Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada ee Magaalada Winterthur**. Haddii laguu soo saaro go'aan qoraal ah oo ah inaan codsigaaga la gelin ama lagu diido, **waxaad muddo 30 maalmood gudahood ah ka gudbin kartaa racfaan qoraal ah** Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada ee Magaalada Winterthur, Pionierstrasse 5, 8403 Winterthur.

Macluumaadkaaga iyo warbixinaha aad bixiso waxaa loo tixgeliyaa **xog shakhsiyeed oo si gaar ah loo ilaaliyo** marka loo eego Sharciga Ilaalinta Xogta. Shaqaalaha Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada waxa ay kaliya farsamayn karaan xogta lagama maarmaanka u ah fulinta waajibaadka sharciyeed ee ku xusan Sharciga Kaalmada Bulshada (SHG), Xeerka Daryeelka Magangelyo-doonka (AfV)[1], iyo sidoo kale Sharciga Federaalka ee Taageerada Dadka Baahan (ZUG). Adiga oo ah qof helaya kaalmo, waxaad xaq u leedahay inaad aragto xogtaada.

## 2. Waa maxay waajibaadkaygu?

### 2.1 Waajibaadka Bixinta Macluumaadka iyo Wargelinta

Marka aad codsato Kaalmada Bulshada, waa inaad **si shakhsi ah isu aqoonsiisaa**. Waa inaad **si buuxda oo run** ah **uga jawaabtaa** su'aalaha la xiriira shaqsiyadaada, sidoo kale su'aalaha la xiriira xaaskaaga/ninkaaga ama lammaanahaaga diiwaangashan, ama lammaanahaaga aad wada nooshihiin, iyo sidoo kale carruurtaada aan qaan-gaarin, iyo xaaladaha gaarka ah iyo kuwa dhaqaale ee qof kasta oo ka mid ah.

Iyadoo lagu salaynayo § 18 SHG iyo § 28 SHV, waa inaad si degdeg ah oo aan lagaa codsan uga warbixisaa Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada **dhammaan isbeddellada** ku yimaadda xaaladda dakhliga iyo hantida, xaaladaha shakhsiyeed iyo kuwa qoyska, iyo sidoo kale xaaladaha deggenaanshaha (tusaale ahaan beddelka guriga, ka-guuridda ama soo-degidda dad kale, ama guur). Sidoo kale waa in la soo sheego isbeddel kasta oo ku yimaadda oggolaanshaha joogitaanka ama deggenaanshaha joogtada ah. Helitaanka hawlgabyo ama gunnooyin nooc kasta ah, lacagaha caymiska ama taageerooyinka dhaqaale ee ay bixiyaan dhinacyo saddexaad waa in sidoo kale si degdeg ah loo soo sheego. Waajibaadkan wargelintu wuxuu sidoo kale khuseeyaa isbeddellada ku yimaadda xaaladda dakhliga iyo hantida, iyo sidoo kale xaaladaha shakhsiyeed iyo kuwa qoyska ee xaaska/ninka, lammaanaha diiwaangashan, lammaanaha wada noolaanshaha iyo carruurta aan qaan-gaarin, haddii ay ka diiwaangashan yihiin isla qoyska. Gaar ahaan waa in sidoo kale la soo sheego dhaxallada la helo inta lagu jiro taageerada dhaqaale iyo ka dib taageerada dhaqaale (illaa 15 sano ka dib helitaankii ugu dambeeyey ee Kaalmada Bulshada).

Fasaxyada ama joogitaanka dibadda waa inaad horay ugu sii sheegtaa Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada, isla markaana aad oggolaansho ka heshaa. Ma jiro xuquuq guud oo lagu dalban karo fasax ama joogitaan dibadda ah. Maqnaanshaha **aan la oggolaan** ama maqnaanshaha ka dheeraada muddadii la oggolaaday waxay keeni karaan **dhimista, dib-u-celinta** ama **joojinta taageerada la bixiyo**.

### 2.2 Yaraynta Baahida Taageerada

Qofka aan awoodin inuu kharashka noloshiisa ku daboolo dhaqaalihiisa gaarka ah si ku filan ama waqtigeeda, wuxuu xaq u leeyahay Kaalmada Dhaqaale ee Bulshada (§ 14 SHG). Iyadoo lagu salaynayo mabda'aan kaabista ah, Kaalmada Dhaqaale ee Bulshada waxaa la bixiyaa oo keliya marka qofku aanu awoodin **inuu naftiisa ama caawimada dhinacyo kale** kaga baxo xaalad adag.

Sidaa darteed waxaa waajib kugu ah inaad ka faa'iidaysato **dhammaan fursadaha lagu wanaajin karo xaaladdaada shakhsiyeed iyo tan dhaqaale**. Arrintaas waxaa ka mid ah isticmaalka awooddaada shaqo. Qofka helaya taageerada waxaa laga filayaa inuu si firfircoon uga qayb qaato isdhexgalka degdegga ah ee dhinaca shaqada iyo bulshada (oo ay ku jirto ka qaybgalka tallaabooyinka isdhexgalka ee macquulka ah).
Intaa waxaa dheer, waxaa waajib kugu ah inaad dalbato dhammaan xuquuqaha dhaqaale ee ka horreeya xaqa Kaalmada Dhaqaale ee Bulshada (tusaale ahaan xuquuqaha gunnooyinka maalinlaha ah iyo hawlgabka, xuquuqaha gunnooyinka qoyska iyo hormariska masruufka, iyo xuquuqaha deeqaha waxbarashada). Xuquuqahaas waa in, inta sharcigu oggol yahay, lagu wareejiyaa Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada.

### 2.3 U Hoggaansanaanta Shuruudaha iyo Dhimista Taageerada

Iyadoo lagu salaynayo § 21 SHG, § 23 SHV iyo § 17 farqaddiisa 4aad ee AfV, Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada **waxay ku siin kartaa shuruudo qoraal ah**, tusaale ahaan inaad qabato shaqo ku habboon oo mushahar leh ama aad ka qayb gasho tallaabo isdhexgal. Haddii aad, inkastoo laguugu sheegay in taageerada la dhimi karo ama la joojin karo, aadan fulin shuruudahaas, taageerada waxaa lagu dhimi karaa ama lagu joojin karaa ilaa xad dhan 30% baahida aasaasiga ah ee kharashka nolosha (GBL). Sidoo kale gunnooyinka isdhexgalka ama lacagaha dakhliga laga dhaafo xisaabinta waxaa la dhimi karaa ama gebi ahaanba lama sii bixin karo (§ 24 iyo § 24a SHG iyo § 17 farqaddiisa 1aad ee AfV).

### 2.4 Waajibaadka Taageerada ee Qaraabada

Qaraabadaada ku jirta xariiqda kor iyo hoos u socota ee qaraabonimada (carruurta, waalidiinta, carruurta ay carruurtaadu dhaleen, awoowayaasha iyo ayeeyooyinka) guud ahaan **waxaa waajib ku ah inay bixiyaan taageero** (Qodobbada 328 iyo 329 ee Xeerka Madaniga ah). Haddii la helo Kaalmada Dhaqaale ee Bulshada, Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada waxay baari doontaa haddii qaraabadan ay saaran tahay waajibaad wax-ku-biirin ah, iyadoo lagu salaynayo awooddooda dhaqaale.

[1] Sida ku xusan AfV, magangelyo-doonayaasha haysta oggolaanshaha N, dadka u baahan ilaalinta ee haysta oggolaanshaha S, iyo ajaanibta si ku-meel-gaar ah loo aqbalay ee haysta oggolaanshaha F ayaa la taageeraa. Dadka lagu taageero AfV waxaa si kaabis ah ugu dabaqma Sharciga Kaalmada Bulshada (SHG) iyo Xeerka Kaalmada Bulshada (SHV).

**2.5 Waajibaadka Dib-u-Bixinta Marka Taageerada Si Sharci Ah Loo Helay**

Iyada oo lagu saleynayo Qaybta 27aad ee Sharciga Kaalmada Bulshada (SHG) iyo Qaybta 18aad faqradda 2aad ee Xeerka Daryeelka Magangelyada (AfV), adiga oo ah qof helaya taageero, waxaa waajib kugu ah inaad **dib u celiso** adeegyada / lacagaha Kaalmada Bulshada ee si sharci ah loogu helay naftaada, xaaskaaga / saygaaga ama lammaanahaaga diiwaangashan, iyo carruurtaada yaryar:

- haddii adiga ama dadka kor lagu xusay **dib looga siiyo si taariikh hore ugu dhaqan galaysa** lacagaha caymisyada bulshada ama kuwa gaarka loo leeyahay (tusaale ahaan gunnooyinka maalinlaha ah ee caymiska shaqo la'aanta, lacagaha caymiska naafanimada, caymiska shilalka, sanduuqa hawlgabka (BVG) ama Xafiiska Gunnada Dheeraadka ah) ama lacagaha ay bixiyaan dhinacyo saddexaad (§ 27 farqaddiisa 1aad xarafkiisa a ee SHG, § 18 farqaddiisa 2aad xarafkiisa a ee AfV). Xaaladdan, waxaa lagaa doonayaa inaad dib u bixiso ugu badnaan oo keliya lacagaha Kaalmada Bulshada ee la bixiyay muddadii aad markii dambe heshay lacagaha caymiska,
- haddii adiga ama mid ka mid ah dadka kor lagu xusay uu helo hanti ama dhaqaale wanaagsan oo ka dhashay **dhaxal, ku guulaysiga bakhtiyaanasiib** ama sababo kale oo aan ka iman shaqadiisa gaarka ah (§ 27 farqaddiisa 1aad xarafkiisa b ee SHG, § 18 farqaddiisa 2aad xarafkiisa b ee AfV),
- haddii adiga ama mid ka mid ah dadka kor lagu xusay uu **shaqadiisa gaarka ah** ku gaadho xaalad dhaqaale oo aad u wanaagsan oo ay ku habboon tahay in dib loo bixiyo taageeradii la helay (§ 27 farqaddiisa 1aad xarafkiisa b ee SHG),
- haddii hanti hore u jirtay balse aan markiiba lacag caddaan ah loo beddeli karin (aan dareere ahayn), sida dhul, guri ama guri dabaqeed qof leeyahay, saamiyada dhaxalka ama hanti kale, **ay markii dambe noqdaan kuwo la heli karo** (§ 27 farqaddiisa 1aad xarafkiisa c oo lala akhrinayo § 20 SHG).

Haddii **qofka helaya taageerada uu geeriyoodo**, dib-u-bixinta lacagaha Kaalmada Bulshada ee la bixiyay waxaa laga dalban karaa hantida uu ka tagay (§ 28 SHG).

Lacagaha Kaalmada Bulshada ee la bixiyay in ka badan 15 sano ka hor **dib looma dalban karo**. Waxaa ka reeban lacagaha ay jirto waajibaad dib-u-bixin oo lagu saxeexay, ama – marka ay jirto lahaanshaha hanti ma-guurto ah – lagu diiwaangeliyay rahmad hanti ma-guurto ah (§ 30 SHG).

**2.6 Waajibaadka Dib-u-Bixinta Marka Taageerada Si Sharci-darro Ah Loo Helay iyo Qodobbada Ciqaabta**

Haddii lacagaha Kaalmada Bulshada lagu helo iyadoo la bixiyay macluumaad **aan run ahayn** ama **aan dhammaystirnayn**, waa in lacagahaas dib loo bixiyaa iyadoo lagu salaynayo § 26 xarafkiisa a ee SHG iyo § 18 farqaddiisa 1aad ee AfV. Tani waxay sidoo kale khusaysaa haddii aad lacagaha Kaalmada Bulshada ee lagu siiyay u isticmaasho ujeeddooyin aan ahayn kuwa ay cayimeen Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada, taasoo keenta in Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada ay mar kale bixiyaan kharashaadkaas (§ 26 xarafkiisa b ee SHG, § 17 farqaddiisa 2aad xarafkiisa c ee AfV).

Isticmaalka taageerada **si ka baxsan ujeeddadii loogu talagalay** wuxuu sidoo kale, iyadoo lagu salaynayo § 24 farqaddiisa 1aad xarafkiisa a tirsigiisa 5aad ee SHG iyo § 17 farqaddiisa 1aad xarafkiisa a ee AfV, keeni karaa dhimista taageerada.

Haddii la helo taageero aan qofku xaq u lahayn, waxaa jira waajibaad dib-u-bixin oo ku salaysan **hodantinimo aan sharci ahayn** (iyadoo si u dhiganta loo adeegsanayo Qodobka 62 iyo kuwa xiga ee Xeerka Waajibaadka). Waxaa waajib kugu ah inaad si degdeg ah ugu wargeliso Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada lacagaha noocaas ah ee si aan caadi ahayn laguugu soo wareejiyay, isla markaana aad dib u bixiso.

**Fiiro gaar ah:** Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada waxaa waajib ku ah inay hubiso xaqaaga helitaanka taageerada iyo xuquuq kasta oo suurtagal ah oo aad ku leedahay dhinacyo saddexaad. Ujeeddadaas awgeed, bilowga taageeradaada iyo inta lagu jiro muddada aad taageerada helayso, waxaa caadi ahaan laga soo qaataa Hay'adda Caymiska Bulshada ee Zürich warbixinta koontadaada gaarka ah ee AHV. Intaa waxaa dheer, sida caadiga ah waxaa sidoo kale la sameeyaa weydiin loo diro Xafiiska Gaadiidka Waddooyinka ee kantoonka.

Haddii uu jiro **tuhun ah in taageero lagu helay si sharci-darro ah**, Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada waxay sidoo kale xaq u leedahay, iyadoo lagu salaynayo § 18 farqaddiisa 4aad, § 47 xarafkiisa c iyo § 48 farqaddiisa 2aad ee SHG iyo sidoo kale § 27 SHV, inay hubiso macluumaadka uu bixiyay qofka helaya taageerada, tusaale ahaan iyadoo la xiriiraysa hay'adaha ay khusayso, loo-shaqeeyayaasha ama mulkiilayaasha guryaha, isla markaana ay macluumaad ka heli karto dhinacyo saddexaad.

Iyadoo lagu salaynayo Qodobka 148 xarafkiisa a ee Xeerka Ciqaabta ee Switzerland (StGB), Adeegyada Bulshada ee Magaalada Winterthur waxaa waajib ku ah inay gudbiyaan dacwad ciqaabeed haddii qof uu si sharci-darro ah naftiisa ama qof kale ugu helo taageerooyin isagoo **qarinaya isbeddellada ku yimid xaaladdiisa, bixinaya macluumaad aan run ahayn ama aan dhammaystirnayn, ama isagoo si kale dadka u marin-habaabiyay**. Haddii aad u dhaqanto si khiyaano ah, waa inaad filaysaa in lagaa gudbiyo dacwad ciqaabeed oo ku saabsan khiyaano sida ku xusan Qodobka 146 ee StGB. Xukun lagu helo Qodobka 148 xarafkiisa a ama Qodobka 146 ee StGB wuxuu muwaadiniinta ajnabiga ah u horseedi karaa masaafurin laga saaro Switzerland.

## 3. Waajibaadka Wargelinta ee Xafiiska Socdaalka

Waaxda Guud ee Kaalmada Bulshada / Waaxda Guud ee Magangelyada ee Magaalada Winterthur waxaa sharci ahaan waajib ku ah inay **Xafiiska Socdaalka** ee Kantoonka Zürich ku wargeliso bixinta Kaalmada Dhaqaale ee Bulshada ee la siiyo muwaadiniinta ajnabiga ah. Waajibaadkan wargelintu ma khuseeyo qaxootiga si ku-meel-gaar ah loo aqbalay iyo qaxootiga si rasmi ah loo aqoonsaday. Helitaanka Kaalmada Dhaqaale ee Bulshada wuxuu keeni karaa in Xafiiska Socdaalku **kala noqdo oggolaanshaha joogitaanka ama oggolaanshaha deggenaanshaha joogtada ah**, **ama uu hoos u dhigo heerka oggolaanshaha deggenaanshaha joogtada ah**.

(Nooca 1.2. / 02.03.2021)